**Xeer-Sharci, ee 20 Maajo 1959, lamba. 6 diw.**

**Xeerar cusub, ee xagga nidaaminta lacag-bixinta dhex-mareysa Itaaliya iyo Soomaaliya.**

## MAAMULAHA

Markuu arkay sharciga 4 Nofember 1951, lamba. 1301, oo meelmarinaya (ansixinaya), fulinaayana Mucaahadada Wasaayada xagga Dhulka Soomaaliya;

Markuu arkay Amar-gooyada 5ta Jennaayo 1956, lamba. 2, Qod. 8aad;

Markuu arkay amar-gooyada lamba. 56, ee 1da Setembere 1950: "Nidaamka lacag-bixinta, ee ka dhexeeya Itaaliya iyo Soomaaliya";

Markuu arkay Amargooyada lamba. 136, ee 9 Disember 1950: "Wax-ka-beddelka Qod. 7aad, ee Amargooyada lamba. 56, ee 1da Setembere 1950;

Markuu arkay Amargooyada lamba. 2, ee 3 Jennaayo 1951, wax-ka-beddela Amargooyada lr. 56, ee 1da Setembere 1950;

Markuu arkay X.M.J. 5 Maarso 1955, lamba. 371, oo ay dhammeystireen wax-ka-beddelidda ku xusan X.M.J. 2 Disember 1958, lamba. 1131, ee la xiriira Dastuurka (Xeerka) Sanduuqa xagga wareegga Lacagaha, ee Soomaaliya;

Markuu arkay sharciga 8 Disenber 1956, lamba. 15: "Xeer-nidaamiyaha ku saabsan isdhaafsiga ganacsi, eel ala wadaago dibedda iyo nidaamka lacagaha",

Markuu arkay xeerka Maamul (XM) lr. 580025, ee 31 Maarso 1959 oo siinaya sanduuqa xagga Wareegga Lacagaha, ee Soomaaliya, waajibaadka ikhtisaas, ee Laamaha ku yaal Muqdisho, ee Bangiga Itaalya;

Markuu Aqoonsaday baahida iyo degdegta loo qabo in wax-ka-beddel lagu sameeyo xeerarka (axkaamta) khuseysa Nidaamka lacag-bixinta, ee u dhexeeyo Itaaliya iyo Soomaaliya, xagga wixii la xiriira waajibaad-siinta Sanduuqa Wareegga Lacagaha, ee Soomaaliya;

Markuu arkay soo-jeedinta madaxa Xafiiska Qorsheynta oo isafgarad kala yeeshay Wasiirka Arrimaha Dhaqaalaha iyo Wasiirka Arrimaha Maaliyadda;

Markuu Dhegeystay Golaha Wasiirrada;

## WUXUU XEERAYAA

### Qod. 1

Laga bilaabo 6da Abriil 1959, nidaamka lacag/bixinta ee u dhaxeysa Talyaaniga iyo Soomaaliya waxaa lagu sameynayaa oo la marinayaa xisaab-bangi oo uu haynayo Maamulka Dhexe, ee Bangiga Itaaliya - magaalada Roma - oo wakiil u ah Xafiiska Talyaaniga, ee Sarrifka, kuna qoran magaca Sanduuqa Wareegga Lacagaha, ee Soomaaliya, oo wakiil u ah Maamulka Wasaayada Talyaaniga, ee Soomaaliya.

### Qod. 2

Xisaabta-bangi oo horey loo soo sheegay, waxaa lagu nidaaminayaa waxyaabaha soo socda:

1) Qiimooyinka lagama maarmaanka u ah badeecooyinka soomaaliyeed ee loo qoondeeyey in loo-waarido (laga soo-dejiyo) Itaaliya iyo badeecooyinka talyaaniga oo loo qoondeeyey in loo waarido Soomaaliya;
2) Kharashaadka lagama maarmaanka u ah is-dhaafsiga badeecooyin, oo kor lagu soo sheegay, sida nooliga badeed iyo kharashaadka daabulaadda, dekadeed, maraakiibta, hawl-fududeynta, caymiska, khidmadaha iwm;
3) Lacagta loo qoondeeyay baahiyaha Maamulka Wasaayada Talyaaniga ee Soomaaliya;
4) Xawaaladaha muwaadininta talyaaniga ee jooga somalia ee loo diro qoysaskooda ku nool talyaaniga, kuwaas oo ah masruuf iyo keydsi;

5) Baaqiga xisaabaha bangiyeed, ee ka dhex furan Maamulka boostada, taararka iyo taleefonada, ee talyaaniga, iyo Agaasinka Adeegyada Boostada iyo Isgaarsiinta ee ka jira gudaha Soomaaliya;
6) Kharashaadka matalaada;
7) Kharashaadka dayactirka, waabka iyo habeynta beddelaadda;
8) Mushaharooyinka, khidmadaha, iwm;
9) Kharashaadka safarka;
10) Kharashaadka masruufka, maciishada, cisbitaalka iyo waxbarashada;
11) Dakhliga (dakhliyada) ka soo gala adeegyada guud (canshuuraha iyo ganaaxyada);
12) Caymisyada kala duwan iyo wixii dib-u-caymin ah;
13) Faa'iidooyinka Shirkadaha Maraakiibta iyo Diyaaradaha iyo shirkadaha daabulaada;
14) Saamiya ka-qaybgalla shirkadaha iyo rukunnada,
15) Dib-u-eegisyada, xuquuqda lahaanshaha, rukhsadaha, sumadaha ganacsiga iyo xuquuqda qoraaga;
16) Xuquuqda ka-aaiideysiga filimada;
17) Kharashaadka xayeysiinta;
18) Kharashaadka laxiriira kaqeybgalka Carwooyinka;
19) Ka-qaybgalla laamaha, kharashaadka maareynta ee Xarunta;
20) Lacagaha lagu bixiyo khidmadaha maareynta;
21) Lacagaha la siiyo fanaaniinta iyo ciyaartooyda;
22) Xawaaladaha muhaajiriinta (qurbajoogga);
23) Faa'iidooyinka laga dhex helo ka-qaybgallada ay shirkadaha ganacsiga ku leeyihiin shirkado ay leeyihiin dad maalqabeenno ah;
24) Wixii macaash laga helo maareyn shirkado;
25) Lacag-bixinno kale oo lagu aqbali karo heshiis dhex mara Maamulada awooda leh ee Talyaaniga iyo Soomaaliya.

**Qod. 3**

Qaansheegtooyinka la xiriira badeecooyinka dulucda u ah isdhaafsiga ganacsi, ee ka dhexeeya Itaaliya iyo Soomaaliya waxaa lagu qorayaa Shilin Soomaal cagta qalaadama Liirada talyaaniga, isla lacagta qalaad oo lagu cabbirayo (sheegayo) dhammaan lacag/bixinnada lagu nidaaminayo ayada la adeegsanayo xisaabta bangi oo ku asteysan Liirada talyaaniga,ee ku xusan Qod. 1aad.

**Qod. 4**

Sanduuqa Wareegga Lacagaha, ee Soomaaliya – Muqdisho – iyo Bangiga Italiya, ee magaalada Roma, waxa ay isku wargelinayaa lacag-shubidda amaahda ama deynta, ee xisaabta la xiganayo oo ku furan Liirada Talyaaniga, amarrada lacag-bixinta, sida ay kala horreeyaan, waxaa sí gooni ah loogu cabbirayaa (asteynaya) Liirada Talyaaniga.

**Qod. 5**

Liira u-beddelidda lacagta Shili soomaaliga, ee ku jirta Sanduuqa Wareegga lacagaha, ee Soomaaliya oo gudaha Muqdisho iyo Shilin Soomaali u-beddelka amarrada lacag-bixinnada uu soo-saaro Maamulka Dhexe, ee Bamngiga Itaaliya - Roma - waxa uu ku dhacayaa sarrifka jira maalinta hawlgalka.

**Qod. 6**

Sarrifka ku xusan Qod. hore waxaa lagu gooyey Litir 87.50 halkii Shilin Soomaali, oo u-shaqaynaya:

a) celceliska qiimaha udhaxeeya xadka faragalinta ee Xafiiska Sarrifka talyaaniga ee xaggagorgortanka ee doolarka Mareykanka (yacni Lit. 025 qiimaha celceliska inta udhaxeysa sicirka sarrifka gadashada ee Lit. 620.50 iyo kan sicirka iibka ee Lit. 629.50;
b) U-dhigmidda Shilin soomaaliga marka loo eego doolarka Maraykanka oo hadd ah US $ 0.14 halkii Shilin soomaali ah.

Sarrifka horey loo soo sheegay, ee Lirada Talyaaniga 87.50 ayaa waxaa loo rogayaa, mar kasta oo uu isbeddel ku yimaado xuduudda faragelinta gorgortanka doollarka Mareykankaiyo/ama inta uu u-dhigmo Shilinka Soomaaliga marka loo eego doollarka.

**Qod. 7**

Sanduuqa wareegga lacagaha ee Soomaaliya - Muqdisho - waxa uu magaca Maaamulka Wasaayada, ee Soomaaliya, ku furayaa xisaab-bangi, ee maareynta lacagaha qalaad - xisaab-bangi, oo shili soomaali ah, oo oo aan dulsaar lahayn, taas oo la amaah ahaan lagu xisaabayo shubitaanka lacagaha lagu bixinayo Itaaliya, deyn ahaanna ah lacagaha lagu bixinayo Soomaaliya.

Xisaabtaa waa in aysan muujin siyaado ama nusqaan ka badan, xagga qiimaha Shilin soomaaliga, shanboqol-milyan oo Liirada Talyaaniga ah.

**Qod. 8**

Maamulka Wasaayada Talyaaniga, ee Soomaaliya, waxa uu, saddexdii biloodba mar, ku shubayaa xisaab ku furan magaciisa -- xisaabta maareynta lacagaha qalaad - ama helayaa isla xisaabtaa lacagta ka soo xasisha farqiga u dhexeeya sarrifyada ee yimaada muddada laba-biloodleyda ah.

**Qod. 9**

Dhammaan rasiidhada la bixiyey intii ay jireen xiriirrada tooska ah ee ka dhexeeya Sanduuqa Wareegga Lacagaha ee Soomaaliya, Bangiyada Wakiilada iyo malqabeenka ka shaqeeya tasfiyada waxaa la saarayaa canshuurta boollada, ee góan, oo dhan Sh. So. 030.

**Qod. 10**

Xilalka iyo waajibaadkaka iyo awoodaha uu bixiyay sharciga 8dii Diseembar 1956, - n. 15, Laanta Muqdisho ee Bankiga Talyaaniga waxaa loogu talaga uu saarayo Sharciga 8dal Disember 1956, ee lr. 15, Laanta Muqdisho, ee Bangiga Itaaliya, waxa ay noqonayaan kuwo loo wareejiyo Sanduuqa Wareegga Lacagaha, ee Soomaaliya.

**Qod. 11**

Xeerkan - Sharci waxa uu baabiínayaa (tirtirayaa):

— Amargooyo lamba. 56, ee 1da Sebtembar 1950;

— Amargooyo lamba. 136 ee 9kii Diseembar 1950;

— Amagooyo lamba.. 2 ee 3-dii Janaayo, 1951.

**Qod. 12**

Xeerkan-Sharci waxa uu dhaqangelayaa Abiriile 6da Abiriile 1959,, Waxaana lagu nashrinayaa Faafinta Rasmiga ah, waxaana la hor-dhigayaa Golaha Xeerdejinta si uu sharci ugu rogo.

Muqdisho, 20ka Maajo 1959.

Maamulaha

**Marie di Stefano**

Wasiirka Kowaad

**Cabdullaahi Ciise Maxamuud**

Wasiirka Arrimaha Dibedda

**Xaaji Faarax Cali Cumar**

Waa Arkay waana diiwaangeliyey-

Diiw. lamba. 16 – xaashi lamba. 110.

Muqdisho, 23 Juunyo 1959.

Hantidhowraha: **Spadaro**